



DUGSIYADA DADWAYNAHA PORTLAND BAAKADDA WAREEJINTA 2026-27



TAARIIXHAHA QORITUURKA Furitaanka Codsiga Qorituurka iyo Dhibaataada Wakhtiga Ugu Dambeeya ee Codsiyada Qorituurka	Ardayda Galaysa Fasalada 6^{aad} - 12^{aad} Noofambar 12, 2025, 8:00 GH Diisambar 12, 2025, 5:00 GH	Ardayda Galaysa Fasalada KG - 5^{aad} Febraayo 18, 2026, 8:00 GH Maarso 18, 2026, 5:00 GD
---	--	--

Dugsiyo xaafadeed oo xooggan waa aasaaska Degmada Dugsiyada Dadwaynaha Portland. Qoysaska isku dayaya inay qoraan carruurtooda waxa lagu dhiirigalinayaa inay ka soo qaybgalaan munaasabad furan oo ka dhacaysa dugsiga xaafadda ee u adeega cinwaanada guryahooga. Liis dhammaystiran oo ah Munaasabadaha Furan iyo macluumaad ku saabsan Connect to Kinder waxa laga heli karaa pps.net/openhouses.

Ardayda **deggan meelo ka baxsan xuduudka PPS** ma isticmaali karaan codsigan, maadaama uusan waafaqsanayn shuruudda gobolka ee u kala wareegga gudaha degmada. Codsiga kale oo loogu talagalay ardayda ka socda degmooyinka kale ee Oregon ayaa diyaar noqon doona Abriil. Booqo pps.net/transfer wixii macluumaad dheeraad ah.

QORITUURKA DOORASHADA DUGSIGA EE SANADLAHA AH

Wareejinaha diiradda saara ikhtiyaarada, barnaamijyada baddiilka ah, iyo barnaamijyada labada luuqadood wax lagu barto waxa lagu sameeyaa qorituur kombiyuutar la adeegsanayo oo sanadle ah.

- Ardayda buuxinaya shuruudaha dakhliga ee fadaraalka ama kuwa ardaydooda barbaarinta dhigtaa ay aadaan barnaamij ah Head Start waxay kordhiyeen fursadaha aqbalaadda galitaanka dugsiga qaar. Liis ah barnaamijyada mutaystay, waydiiso **Foomka Mutaysiga Dakhliga ee Qarsoodiga ah**. Haddii ardaygaagu u qalmo, gudbi foomka ugu dambayn wakhtiga ugu dambeeya ee codsiga.
- Natiijooyinka qorituurka waxa loo diri doonaa qoysaska lix ilaa siddeed toddobaad kadib wakhtiga ugu dambeeya marka la eego fasalka ardayga.
- Ardayda loo ansixiyey wareejinaha qorituurka waxay haysan doonaan toban maalmood inay diidaan bandhigga, xaaladaha qaarna, si loo xaqiijyo inay buuxiyeen dhammaan shuruudaha waajibka ah.
- Marka la eego ardayda aan helin wax ka mid ah kuwa ay doorteen ama buuxin waayay shuruudaha lama-huraanka ah, waxa lagu qori doonaa dugsiga xaafaddooda, laba dugsiga, ama dugsiga/barnaamijka ay hadda ku jiraan.
- Ardayda liiska sugitaanka ku jira waxa meelayn loo soo bandhigi ilaa maalinta 20aad ee sanad dugsiyeedka.
- Haddii waalid arday leh IEP codsado dugsiga gaar ah, waa la diidi karaa haddii dugsigu uusan bixin karin Waxbarasho Dadwayne, Bilaash ah oo Habboon.
- Kadib wakhtiga ugu dambeeya ee qorituurka codsiyada cusub waxa lagu dari karaa liisaska sugitaanka iyadoo loo marayo Isqoris Furan.
- Macluumaad qorituur oo faahfaahsan, booqo pps.net/departments/enrollment-transfer/transfer-english/lottery/lottery-logic.

MACLUUMAADKA CODSIGA EE DHIBAATADA

Codsiga dhibaataadu wuxuu u oggolaanayaa qoysaska inay codsadaan u wareejin dugsi xaafadda ah oo kale, oo uu ku jiro ikhtiyaarka inay ku laabtaan dugsigii xaafaddooda hadday haystaan wareejin la ansixiyey. Qodob aasaasi ah oo hannaanka codsiga ah waa in dugsiga kasta ay waajib tahay inuu ku dadaalo inuu buuxiyo baahiyaha ardayda lagu soo qoray. Nidaamka codsiga wuxuu fursad u yahay dhib-xallinta: qoysasku waxay sharraxaad ka bixin sababta baahiyaha ilmahooga loogu dabooli waayey dugsiga xaafaddooda (ama hadda uu aado) iyo/ama sida u wareejinta dugsi xaafadda ah oo kale wax ugu soo kordhin doonto. Maamulayaasha dugsiga hadda iyo kuwa la codsaday waxa la waydiin karaa inay miisaamaan wax ka qabashada walaacyada qoyska iyo daboolidda baahiyaha ilmaha.

Ansixinta codsiga waxay u baahan tahay xaqiijin in caafimaadka, badbaadada ama waxbarashada ardayga wax u soo kordhayaan markuu ka tago dugsiga uu hadda aado, iyo sidoo kale in wax ka bannaan yihiin dugsiga uu codsado. Go'aamada codsiga waxa loo qaataa si qof-calaa-qof ah waxayna qaadan karaan dhawr toddobaad in la soo gunaanado. Foomamka waxa la

heli karaa sanadka oo dhan. Si aad u hesho fursadda ugu fiican ee meelayn, gudbi codsiyada ugu dambayn dhammaadka codsiga wareejinta qorituurka ee fasalka ardayga. Macluumaad dheeraad ah, booqo pps.net/petitionprocess.

KU QORISTA LABA DUGSI EE JEFFERSON

Ardayda fasalka siddeedaad ee hadda ee deggan xuduudka Jefferson waxa waajib ah inay bayaamiyaan doorashadooda labada dugsi: ama Jefferson Middle College for Advanced Studies ama dugsiga sare ee dhammaystiran ee xaafaddooda. Dugsiga sare ee labada dugsi ayaa noqon doona dugsiga lagugu qoro haddii wareejinta aan la ansixin. Ardayda PPS ee wakhtigan waa inay la tashadaan la-taliyahooga fasalka 8aad ama ku gudbiyaan doorashadooda onlayn ugu dambayn Diisambar 12. Booqo pps.net/Jefferson-is-Rising wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan casriyeynta Jeffersaon iyo isbeddelada isqorista ee la soo jeediyey laga bilaabo 2027-28.

— **ERAYADA WAREEJINTA EE SIDA BADAN LA ISTICMAALO IYO HABRAACYADA QORITUURKA** —
Gelitaanka Dugsiga Barbaarinta: Sharci Oregon wuxuu dhigayaa inay waajib tahay in carruurto ugu yaraan shan jir ahaadaan Sibtambar 1 si ay u galaan barbaarinta iyo lix jir fasalka koowaad. Dugsiyada Dadwaynaha Portland ma bixiyaan galitaanka xilliga hore ee barbaarinta.

Dugsiga Xaafadda: Dugsiga xaafaddu wuxuu u adeegaa aag gaar ah. Si aad u aqoonsato dugsiga xaafaddaada, booqo pps.net/maps.

Baddiilada PPS: Barnaamijyadani waxay taageeraan arday kala jaad ah. Si aad u hesho faahfaahin ku saabsan Alliance High School, PPS Charter Schools, ama Community-Based Alternative Schools, sidoo kale u hesho macluumaadka Dib-ugu-xirmidda, booqo pps.net/multiplepathways ama wac 503-916-3299.

Ikhtiyaarada Diirad-saarka (Focus Options): Ikhtiyaarada Diirad-saarka waxay bixiyaan barnaamijyo la khaasyeelay oo wato halkudhegyo ama bixin gooni ah ee manhajka.

Wax-ku-barashada Laba Luuqadood: Barnaamijyadani waxay ku bixiyaan waxbarista laba luuqadood. Kuraasta barbaarinta ee bannaan waxa dejiya luuqadda dhaladka iyo xaafadda. Marka la eego ujeedooyinka qorituurka, ku-hadlayaasha luuqaddu waa carruurta ka maqla kulana hadla luuqadda waalidka/masuulka ilaa markay dhasheen. Codsadayaasha wareejintu waxay leeyihiin doorbidista barnaamijka u horseedaya Dugsiga Sare ee Laba Luuqadood Wax lagu Barto ee ka jiro mandaqaddooda. Barnaamijyada qaar waxay u furan yihiin degganayaasha xaafadda oo kaliya. Ardayda galaysa fasalada 1-8 waxa looga baahan karaa inay galaan qiimayn lagu muujinayo heerka aqoonta ay u leeyihiin luuqadda kale. Macluumaad dheeraad ah, booqo pps.net/departments/dual-language/how-to-apply.

Walaalaha Isku Dugsiga ah: Walaalaha meel wada deggan ee qoran dugsi ama barnaamij isku mid ah wakhti isku mid ah. Si aad ugu qalanto mudnaantan wareejinta, ugu yaraan hal walaal ayey waajib tahay inuu sii qoran yahay dugsiga/barnaamijka waxaana waajib ah in loogu qoray doorashadiisa koowaad.

Mutaysiga Dakhlaga: Ardayda buuxiya tilmaamaha fadaraalka ama ka qaybqaata barnaamijyada Head Start waxay leeyihiin mudnaan barnaamijyada intooda badan. Qoysaska waxa waajib ku ah inay gudbiyaan foom dakhli ugu dambayn wakhtiga ugu dambeeya ee fasalka ardayga.

Liiska sugitaanka: Liis sugitaan oo qorituur ah waa liis dalbadayaal ah oo aan loo ansixin doorasho, laakiin loo fidin karayay kursi bannaan hadduu jiro. Liisaska sugitaanku waxay furnaan doonaan ilaa dhammaadka Sibtambar.

Isqorista Furan: Hanaan wareejin oo qorituurka ka dambeeya oo loogu talagalay dugsiyada/barnaamijyada qorituurka. Kadib qorituurka, dugsiyada iyo barnaamijyadu waxay ku qaybiyaan kuraasta soo harta mudnaano qorituur, iyadoo ay jirto suurtagalnimada in tixgalin dheeraad ah la siiyo ardayda qabta duruufaha gaarka ah.

MACLUUMAADKA WAREEJINTA EE GUUD

Si aad gudbiso codsi wareejin, ugu yaraan mid ka mid ah waalidiinta/masuulada ayey waajib tahay inuu leeyahay akoon ParentVUE oo jira. Haddaad caawimo ugu baahan tahay ParentVUE, la xiriiir dugsigaaga ama booqo pps.net/parentvue.

Lama-huraan ma aha in ardaygu qornaado Dugsiyada Dadwaynaha Portland si ay qoysku u gudbiyaan codsi wareejin. Arday kasta oo u baahan inuu isdiwaangeliyo sanad dugsiyeedka soo socda wuxuu sidaas yeeli karaa kadib natiijooyinka wareejinta marka la soosaaro.

Wareejinaha la ansixiyey iyo ku qorista labada dugsi waxa loogu talagalay inay jiraan ilaa laga gaarayo fasalka ugu sarreeya ee dugsi. Wixii isbeddel mustaqbalka ee dugsiyada ah waxa looga baahan yahay ansixin Xarunta Isqorista iyo Wareejinta.

Gaadiidka lagu aadayo dugsiyada loo wareegayo guud ahaan waa masuuliyadda qoyska. Booqo pps.net/transportation wixii macluumaad dheeraad ah.

Qoysaska qoraya carruurtooda markii koowaad, ama kuwa u guuray cinwaan kale, waxa waajib ah inay laba caddaymood oo tilmaamaya guriga siiyaan dugsigooda cusub ama ay aadaan. Qaar ka mid ah barnaamijyada labada luuqadood wax lagu dhigto waxay doorbidista ku saleeyaan cinwaanka guriga. Haddii arday u guuro cinwaan kale kahor inta uusan sanad dugsiyeedku bilaaban, natiijada wareejintu waa isbeddeli kartaa.

Wareejin la ansixiyey waa laga laaban karaa haddii arday u guuray dugsi xaafadeed ama degmo kale kahor inta uusan bilaaban sanad dugsiyeedku ama bixiyo cinwaan guri oo been ah.

Enrollment and Transfer Center

501 N Dixon St, Suite 140, Portland, OR 97227

Imeylka: enrollment-office@pps.net

Cinwaanka Boostada:

P.O. Box 3107, Portland, OR 97208-3107

Taleefanka: 503-916-3205

pps.net/schoolchoice

Dugsiyada Dadwaynaha Portland waxay aqoonsan yihiin kala-jaadnimada iyo qiimaha ay leeyihiin dhammaan dadka iyo kooxaha iyo doorarka ay ku leeyihiin bulshada. Waa siyaasadda Guddida Waxbarashada Dugsiyada Dadwaynaha Portland inuusan jirin takoor ama dhibaataayn ku aadan dadka ama kooxaha oo ku salaysan da'da, midabka, caqiida, naafonimada, xaaladda guurka, waddanka qofku ka soo jeedo, qoomiyadda, diinta, jinsiga ama doorashada jinsiga ee wixii barnaamijyo, hawlo ama shaqaalayn waxbarasho ah.

**MACLUUMAADKA WAALIDKA AMA MAS'UULKA**

Luqadda wada xiriirka: ☐ Ingiriis ☐ Isbaanish ☐ Fiyatnaamiis ☐ Shiine ☐ Ruush ☐ Soomaali

Leeyahay akoon PPS ParentVUE: ☐ Haa ☐ Maya Haddii MAYA, u tag PPS.net/parentvue si aad u samaysato akoonka loo baahan yahay.

Xiriirka ardayga kala dhexeeyo (mid calaamee): ☐ Hooyo ☐ Aabbe ☐ Mas'uul ☐ Kale: _____

Magaca hore ee waalidka: _____ Magaca dambe: _____

Lambarka taleefanka (waa inaad qortaa ugu yaraan mid) Moobayl: _____

Telefoon kale: _____ Limayl: _____

Cinwaanka guriga: _____ Lambarka duddada _____

Magaalada _____ Gobolka _____ Baaqa Boostada _____

MACLUUMAADKA ARDAYGA

Magaca hore ee ardayga: _____ Dhexe: _____

Magaca Dambe: _____

Jinsiga: ☐ Dheddig ☐ Lab ☐ Labadaba Ahayn Taariikhda-dalashada: _____

AQOONSIGA Ardayga# (haddi la yaqaan): _____

Dugsiga/barnaamijka hadda jira, haddii ay jiraan: _____

Fasalka Hadda: _____ Fasalka la codsanaya: _____

Miyuu ku jiraa daryeelka korinta? ☐ Haa ☐ Maya

Magaca Shaqaalaha Kiiska: _____ Taleefanka Lambarka Shaqaalaha Kiiska: _____

Miyuu ardaygaagu xaq u leeyahay Adeegyada Title X/Guri la'aanta? ☐ Haa ☐ Maya

Ardaygaagu ma u qalmaa Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ama Hoyga 504? ☐ Haa ☐ Maya

Ardaygaaga ma la shaqaynayaa Adeegyada Dib-U-Xiriirinta? ☐ Haa ☐ Maya

Hadday Haa tahay: Magaca Iskuduwaha: _____

Miyaad xiiseyneysaa cunugaada inuu kaqeybgalo kooxaha ururka Waxqabadyada Iskuulka ee

Oregon (OSAA)? ☐ Haa ☐ Maya

Hadday "HAA" tahay, ogow in u-qalmitaanka cayaaraha lagu go'aaminayo hanaan gooni ah. Kaqeybgalka waxqabadyada abaabulan ama xerooyinka ama laxiriirida tababarayaasha iskuulka la codsaday inta codsigan bedelka la tixgalinayo waxay halis galineysaa u- qalmitaanka OSAA ee ilmahaaga.

XULASHOYINKA BEDDELKA

Fadlan qor iskuulada (barnaamijyada) aad doorbideyso in cunugaada kaqeyb galo sida loo doorbido (ilaa seddex xulasho).

#1 _____

#2 _____

#3 _____

SABABAHA BADDELKA (Fadlan xulo dhammaan kuwa ku quseeyo)

☐ **La dhigta dugsiga walaal:** _____
Magaca hore ee walaalka Magaca dambe Fasalka hadda

Taariikhda Dhalashada: _____ AQOONSIGA PPS (ikhtiyaari): _____
Wac Xarunta Isqorista & Baddelka haddii aad rabto inaad isku xirto codsiyada laba walaalo ah ood u dalbato isku fasal iyo iskuul

☐ **Dhigashada dugsiga xaafadayda** (kaliya ardayda hada loo baddelayo dugsi kale)

☐ **Baddelashada ay keentay sababo isbeddelka xuduudaha ama Dammaanad-qaad kale oo Guddiga Dugsiga ah**

☐ **Iska qor barnaamijka barashada labada luuqad:** Fadlan sharax xidhiidhka ardaygaagu la leeyahay Waxbarashada Labada Luqadood. Xogtani waxaa loo addeegsan doonaa si go'aan looga gaadho qeybta waxbarashada labada luqadood lagu qaato ee ardaygaaga, iyo haddii loo baahan yahay in lagu sameeyo qiimeyn dheeraad ah.

Qeybaha Luqadda Barnaamijyada ee Waxbarashada Labada Luqadood Lagu Dhigo (DLIA) (Calaamadi dhammaan inta ku khuseysa):

- ☐ Ardeygu luqada uu kula xidhiidhayey inta badan (hadalka iyo dhageysigaba), luqada aan ahayn ilaa markii uu dhashay ugu yaraan hal waalid/daryeelle.
- ☐ Ugu yaraan mid ka mid ah waalidiinta ardayga/daryeelayaasha ayaa wuxuu kula hadlayey luqad ka gedisan ilaa dhalashadiisii
- ☐ Ugu yaraan mid ka mid ah awoowyaasha/abootayaasha ayaa kula hadlayey luqad ka gedisan ilaa dhalashadiisii
- ☐ Ugu yaraan mid ka mid ah ardayga waalidiintiisa/daryeelayaashii ayaa bannaanka guriga ka bartay luqada isaga kula hadlayey si joogta ah ardayga
- ☐ Ardaygu wuxuu rabaa inuu isku bedelo barnaamij kale oo ah kuwa labada luqadood wax lagu barto.
Haddii ay HAA tahay: Fadlan ku qor sababta aad u codsanayso wareejinta sanduuqa hoose.

☐ **Iska diiwaangali barnaamijyada diirada la saaro ee manhajka gaarka ah leh.**

Haddii aad codsanayso focus option ama barnaamijka DLI, ma rabtaa in ardaygaaga loo tixgeliyo Mudnaanta U Qalmitaanka Dakhliga? ☐ Haa ☐ Maya Haddii HAA, waxaa lagu weydiin doonaa inaad bixiso macluumaad dheeraad ah ka hor inta aan mudnaanta la dabaqin.

SABABTA XAGGA HOOSE WAA CODSIGA BEDELKA KALIYA (Macluumaad dheeraad ayaa suurtagal in lagaaga baahdo)

☐ **Baahida daryeelka ilmaha:** _____
Magaca bixiyaha Cinwaanka Taleefanka

Hoos ku bixi macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan muddada aad la jirtay adeeg-bixiyahan iyo caddeymo kale oo muujinaya duruufo adag.

☐ **Baahida gaadiidka.** Ku sharax goobta banaan ee hoose dhibaataada gaadiidka ee iskuulka xaafadaada iyo sida loo horumarin karo hadii cunugaada loo beddalo iskuullada aad codsatay.

☐ **Walaacyada badbaadada ardayda iyo/ama ladnaanta.** Sharax walaacyadaada iyo dhacdooyinka gaarka ah ee ka dhacay dugsiga, isku day kasta oo lagu xallinayo ama wax looga qabtay duruufaha, iyo natiijada. Sidee xaaladda loogu hagaajin karaa beddelka? Maxay saameyn ku yeelanaysaa ardayga haddii beddelka aan la oggolaan?

☐ **Sababo Kale.** Sharax sababta aad u codsatay baddelka adkaansha iyo sababta aad u malaynayso inay tahay xaalad sahlid.

[illegible][illegible]

Taqriikhda

2026-27 BOOSASKA QORITUURKA IKHTIYAARKA DIIRAD-SAARKA

**Waxay tilmaamaysaa dugsiyada ay ardayda u qalanta u-qalmiitaanka Dakhliga (faahfaahinta xiriirka hoose) ka helaan dookhyada bakhtiyaa-nasiibka. Haddii aad u malaynayso in qoyskaagu u qalmo, hubi inaad calaamadeyso sanduuqa u-qalmiitaanka dakhliga ee codsiga.	Barbarinta	Fsl 1	Fsl 2	Fsl 3	Fsl 4	Fsl 5	Fsl 6	Fsl 7	Fsl 8
	Boosaska	Boosaska	Boosaska	Boosaska	Boosaska	Boosaska	Boosaska	Boosaska	Boosaska
BRIDGER-CREATIVE SCIENCE ** 7910 SE Market St 503-916-6336	26	5	14	15	5	0*	Waxaad tegtaa app-ka Isdiwaangalinta Furan ee Dugsiyada Dhexe si laguugu daro liistada sugayaasha		
*Fasalka 5aad oo keliya: Codsadayaasha u doorta BCSS doorashadooda koowaad waxaa lagu dari doonaa liiska sugitaanka. Boosaska liiska sugitaanka waxay isku badeli doonaan boosaska banaan haddii la helo ugu yaraan toban codsi oo doorashada koowaad ah.									
BUCKMAN ARTS 320 SE 16th Ave 503-916-6230	26	0	0	19	19	0	Farshaxanka Buckman waa Barnaamij K-5		
ODYSSEY PROGRAM** 1849 SW 58th Ave 503-916-6310	26	9	10	0	11	6	Waxaad tegtaa app-ka Isdiwaangalinta Furan ee Dugsiyada Dhexe si laguugu daro liistada sugayaasha		
SUNNYSIDE ENVIRONMENTAL* * 3421 SE Salmon St 503-916-6226	26	5	7	18	10	11			
WINTERHAVEN MATH & SCIENCE** 3830 SE 14th Ave 503-916-6200	26	4	5	1	3	1			

BOOSASKA QORITUURKA BADIILKA AH EE PPS

	Barbarinta	Fsl 1	Fsl 2	Fsl 3	Fsl 4	Fsl 5	Fsl 6	Fsl 7	Fsl 8
	Boosaska	Boosaska	Boosaska	Boosaska	Boosaska	Boosaska	Boosaska	Boosaska	Boosaska
ACCESS ACADEMY** 6318 SW Corbett Ave 503-916-3483	ACCESS Academy begins at 2nd grade		26	34	0	0	5	1	3
METROPOLITAN LEARNING CENTER** 2033 NW Glisan St 503-916-5737	26	14	11	14	13	6	Waxaad tegtaa app-ka Isdiiwaangalinta Furan ee Dugsiyada Dhexe si laguugu daro liistada sugayaasha		

BOOSASKA QORITUURKA BARBAARINTA LABADA AF WAX LAGU DHIGTO

Barnaamijyada labada luuqadood waxay ka bilaabmaan Xanaanada Carruurta. Booska la heli karo waa xadidan yahay gelitaanka fasallada 1-5, waxay ku salaysan tahay waayo-aragnimo luuqadeed oo hore waxayna u baahan kartaa qiimeyn luuqadeed. Moodooyinka barnaamijku waxay u baahan yihiin arday kasoo jeeda asal luuqadeed oo kala duwan. Ilaa 50% boosaska waxaa loo qoondeeyay ardayda u qalanta inay noqdaan kuwa ku hadla luuqadda bartilmaameedka. Eeg www.pps.net/departments/enrollment-transfer/transfer-english/lottery/lottery-logic si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.		
GOOBAHA BARNAAMIJKA	Barbarinta	Faahfaahinta Boosaska La Qoondeeyey
	Boosaska	
ISBAANISH WAX KU DHIGA (Meeleynta Mustaqbalka Dugsiga Sarre waxaa go'aaminaya addeegyada aaggaga deeggaanka)		
AINSWORTH (Ida B. Wells/Lincoln)** 2425 SW Vista St. 503-916-6288	52	50% boosaska waxaa loo qoondeeyey ardayda dariska dugsiga Ainsworth.
ATKINSON (Cleveland/Franklin/Grant/McDaniel) 5800 SE Division St. 503-916-6333	25	50% boosaska waxaa loo qoondeeyey ardayda dariska dugsiga Atkinson.
BEACH (Grant/Jefferson/Roosevelt/McDaniel)** 1710 N Humboldt St. 503-916-6236	26	50% boosaska waxaa loo qoondeeyey ardayda dariska dugsiga Beach.
CESAR CHAVEZ (Jefferson/Roosevelt) 5103 N Willis Blvd. 503-916-5666	50	50% boosaska waxaa loo qoondeeyey ardayda dariska dugsiga Cesar Chavez.
JAMES JOHN (Dadka xaafadda deggan oo KALIYA) 7439 N Charleston St. 503-916-6266	25	100% boosaska waxaa loo qoondeeyey ardayda dariska dugsiga James John.
LENT (Cleveland/Franklin/McDaniel) 5105 SE 97th Ave. 503-916-6322	25	Ardayda dariska dugsiga Lent waxay haystaan dammaanad oggolaanaha isdiiwaangalinta ee Xanaanada laga
SCOTT (Dadka xaafadda deggan oo KALIYA) 6700 NE Prescott St. 503-916-6369	50	100% boosaska waxaa loo qoondeeyey ardayda dariska dugsiga Scott.
SITTON (Dadka xaafadda deggan oo KALIYA) 9930 N Smith St. 503-916-6277	25	100% boosaska waxaa loo qoondeeyey ardayda dariska dugsiga Sitton.
WAX KU DHIGISTA RUUSHKA		
KELLY 9030 SE Cooper St. 503-916-6350	25	Barnaamij Degmada oo dhan ah
WAX KU DHIGISTA SHIINAH		
CLARK 1231 SE 92nd Ave 503-916-6431	25	Ardayda kale ee PPS waxay codsan karaan iyada oo lagu meeleyn karo ka bacdi ardayda dariska dugsiga Clark
DR. MARTIN LUTHER KING JR 4906 NE 6th 503-916-6456	50	Kooxeynta Bakhtiyaanasiiibka ee: *Ardayda hadda ee Pre-K iyo walaalahood, *Bedelka Ardayda Ku Hadla Luqada Shiinaha, *Xanaanada Waqtiga Hore ee Albina, *Codsiyada Bedelka & Dariska
WOODSTOCK** 5601 SE 50th Ave. 503-916-6380	52	50% boosaska waxaa loo qoondeeyey ardayda dariska Woodstock.
WAX KU DHIGISTA JABBAANIISKA		
RICHMOND** 2276 SE 41st Ave. 503-916-6220	104	Barnaamij Degmada oo dhan ah
WAX KU DHIGISTA FIITNAAMIISKA		
ROSE CITY PARK** 2334 NE 57th Ave 503-916-5600	52	Barnaamij Degmada oo dhan ah

Ogow: Boosaska baddalku way isbaddali karaan. Wixii soo kordha halkan ayaa la soo dhiga www.pps.net/schoolchoice.

Faahfaahinta u qalmida dakhliga waxaa laga helaa: www.pps.net/departments/enrollment-transfer/transfer-english/lottery/income-eligibility-information.